# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 3aad fadhigii 12aad*

***Wakhtiga uu Furmay: - 09:47*** AM
***Taariikhda:- Salaasa 11 June 2022***

**Gudoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

AjandahaFadhiga:- Warbixinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidanka Qaranka iyo Su'aalaha Mudanayaasha.

Guddoomiye Cabdirisaaq Khaliif Axmed: - Mudanayaal, fadhigu wuu inoo furanyahay, waxaana fadhiya 45 Mudane. Sidoo kale, maanta fadhigan marti inoogu ah Wasaaradda Gaashaandhigga, oo ay hoggaaminayaan Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliyaha Ciidamada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, kuwaas oo ka jawaabaya warqaddii Goluhu u diray, taariikhdu markay ahayd todobadii bisha. Warqaddaasi waxay waafaqsanayd Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobkiisa 53aad, farqaddiisa 7aad (D), iyo Qodobka 65aad, farqaddiisa 3aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada, kuwaas oo Goluhu awood ugu leeyahay inuu masuuliyiinta Qaranka u yeedhi karo, si uu wax uga waydiiyo hawsha ay Qaranka u hayaan.

Waxaan rajaynayaa, haddii Ilaahay idmo, in Wasiirka Gaashaandhiggu ina siin doono warbixin. Waxaan si weyn ugu mahadnaqayaa Wasiirka iyo dhammaan madaxda Wasaaradda Gaashaandhigga ee maanta horteenna fadhiya, kuwaas oo si buuxda uga soo qaybgalay, hadday noqoto Taliyaha Guud ee Ciidanka Qaranka, Guddoomiyaha Maxkamadaha Ciidamada, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Maxkamadaha Ciidamada, Agaasimaha Guud, qaybaha kala duwan ee Ciidanka, iyo Agaasimayaasha waaxyahooda dhammaantood.

Soomaalidu waxay tidhaahdaa: {waxar wadiddii kugu dhibta, kaxaynteedaa lagu dhibaa}. Waraaqo badan ayaannu u dirnay, balse maanta waxay is yidhaahdeen, "Miyaanay Wasiir keli ahi iman?" hase yeeshee, Wasaarad dhan ayay inoogu yimaadeen. Tani waa xaq dastuuri ah oo ay leeyihiin inay yimaadaan; iyaguna waxay leeyihiin xuquuq dastuuri ah oo ah in la ixtiraamo, si wanaagsanna loo soo dhaweeyo, warbixintoodana si fiican looga dhegaysto loona dhuuxo.

Waxaan jeclaan lahaa in Mudane kastaa uu ku mashquulo dhegaysiga warbixinta, isla markaana aanay dhicin in warbixintu noqoto mid si aan qoto dheer loo fahmin, taas oo keeni karta in su'aalo muhiim ahi iman waayaan, ama su'aaluhu noqdaan kuwo laga yaabo

in macluumaadkoodu hore u dhaafay ama laga booday. Macluumaadka Goluhu u baahan yahay waa in si dhab ah loo helo.

Waxaan idinka codsanayaa in arrimaha qaarkood, kuwaas oo u baahan in si gaar ah loo weydiiyo, ama ay khuseeyaan Guddida Arrimaha Gudaha iyo Amniga, loogaga hadlo hab ku habboon, gaar ahaan arrimaha qarsoon ee ay tahay in ay ogaadaan Mudanayaasha oo keliya ama madaxda dalka.

Aad iyo aad baan Mudanayaasha ugu mahadnaqayaa. Hadda waxaan soo dhaweynayaa Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga inuu bilaabo warbixintiisa; haddii uu u baahdo, kaaliyayaashiisuna way dhamaystiri karaan, isaguna wuu ku soo dhaweyn karaa haddii loo baahdo. Dhegaysi wanaagsan.

**Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Md. Cabdiqani Maxamuud Caateeye:** - Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye, waad mahadsan tahay; Shir-guddoonka Golaha Wakiillada, Mudanayaasha Golaha Wakiillada, Taliyaha Ciidanka Qaranka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada, Guddoomiyaha Maxkamadda Darajada 1aad ee Ciidamada Gobollada Galbeedka, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Ciidamada, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga, shaqaalaha Golaha Wakiillada iyo Saxaafadda—dhamaantiin Asalaamu Calaykum.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, salaam kadib, waxaan halkan uga mahadnaqayaa Golaha Wakiillada oo iigu yeedhay halkan, anigoo gudanaya waajibaadkayga dastuuriga ah, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobkiisa 53aad.

Mudane Guddoomiye, haddii aan ka waramo qaab-dhismeedka Wasaaradda Gaashaandhigga, waa wasaarad aad u ballaadhan oo Qaranka miisaan culus ku leh. Waxay ka kooban tahay saddex waaxood oo waaweyn.

1. Waaxda Ciidanka Qaranka
2. Waaxda Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta Ciidamada
3. Waaxda Agaasinka Guud

Haddii aan ka hadlo waajibaadka guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga, fulintooda waxa qaabilsan saddexdan waaxood ee wasaaraddu ka kooban tahay.

Waaxda Ciidanka Qaranka:- Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka ugu horreysa, mabaadi'da Ciidanka Qaranka waxa tilmaamaya Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla. Hawlaha ugu muhiimsan ee Dastuurka iyo xeerarka dalka ku waajibiyey Ciidanka Qaranka waxa ka mid ah:

1. In Ciidanka Qaranku u xil-saaran yahay ilaalinta iyo difaaca madax-bannaanida dalka.
2. Ilaalinta xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland.

3. Tayaynta iyo qaabaynta difaaca Ciidanka Qaranka, iyadoo loo qaabaynayo si joogto ah, si xirfad leh, una habboon Ciidanka Qaranka.
4. Ka-gacan-siinta Xukuumadda sugidda nabadgelyada gudaha iyo wax-ka-qabashada aafooyinka dabiiciga ah.

Maxkamadaha Ciidanka iyo Xeer-ilaalintooda: - Mudane Guddoomiye, haddii aan ka hadlo maxkamadaha Ciidanka iyo xeer-ilaalintooda, waaxda garsoorka Ciidamadu waxay ka kooban tahay maxkamadaha Darajada 1aad (Bariga iyo Galbeedka) iyo Maxkamadda Sare ee Ciidamada, kuwaas oo ay la shaqeeyaan xeer-ilaaliyeyaashoodu. Maxkamadahan waxa la aas-aasay sannadkii 1994-kii, kadib markii ay noqotay lama huraan, waxaana lagu magacaabay xeer Madaxweyne, isla markaana lagu sheegay Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobbadiisa 99aad, 100aad iyo 104aad. Maxkamadaha Ciidamadu waxay gaar u yihiin dhegaysiga dambiyada ciqaabta ah ee lagu soo oogo xubnaha Ciidamada Qaranka, xilliyada nabadgelyada iyo dagaalkaba.

Waaxda Agaasinka guud:- Qaybta Agaasinku, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waa waaxda u xil-saaran socodsiinta, hirgelinta iyo hawl-maalmeedka wasaaradda. Waajibaadyada ugu waaweyn ee wasaaraddu, sida ku cad **Xeerka Kala-Xadaynta Xukuumadda Xeer Lr. 71/2015**, ee waaxdan loo xilsaaray waxa ka mid ah: hubinta helitaanka shaqaalaha ku habboon gudashada hawlaha difaaca Qaranka, horumarinta iyo kor-u-qaadidda tayada shaqaalaha Gaashaandhigga, iyo jihaynta naafada Gaashaandhigga.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sidaan kor ku xusay hawlaha Wasaaradda Gaashaandhigga waxa haya saddexdan waaxood ee waaweyn. Haddaba, si xog mug iyo miisaan leh aad uga heshaan dhammaan hawlaha ay wasaaraddu qabato, waxaan Mudane Guddoomiye kaa codsanayaa inaad iga oggolaato inaan hadalka ku wareejiyo **Taliyaha Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Sareeye Gaas Nuux Ismaaciil Taani**, si uu warbixin inooga siiyo hawlaha Ciidanka Qaranka.

Sareeye Gaas Nuux Ismaaciil Taani:- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoonka Golaha Xeer-dejinta, masuuliyiinta kale ee joogta, iyo Wasiirka Gaashaandhigga—Asalaamu Calaykum. Salaam kadib, Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu u xil-saaran yahay waajibaadka uu Dastuurku qeexay, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Inuu sugo xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana ilaaliyo qaranimadeeda; intaas kaliya kuma koobna ee sidoo kale waxa uu la shaqeeyaa Ciidamada Booliska marka arrimaha amniga gudaha ay adkaadaan.
- Waxa kale oo Ciidamada Qaranku ka qayb-qaataan aafooyinka dabiiciga ah, sida kuwii xeebaha Somaliland ka dhacay ee loo yaqaanay Duufaantii Sagar, halkaas oo aanu ka qaadanay kaalmo laxaad leh, anagoo Ciidanka Qaranka ah.
- Arrimaha xuduudaha ama xadadka Somaliland la leedahay dalalka jaarka ah wax badan ayay Ciidamada Qaranku ka qabteen, waxna way u hadhsan yihiin. Markii

aan Taliyaha Ciidanka Qaranka noqday sannadkii 2005-tii, Ciidamada Qaranku ma dhaafi jirin Burco, halka ciidanka ugu shisheeyaa uu ahaa ciidan qaran.

- Intii aan ahaa taliye qaybeed, muddo ku dhow 30 sano, waxaan joogay Qaybta 31aad ee Bir-jeex.
- Ciidankii ugu horreeyay, anigoo taliye qaybeed ah, ayaan Qaybtii 12aad oo fadhigeedu ahaa magaalada Burco u geeyay Degmada Oog. Sida aad ka warqabtaan, waxay ka mid tahay qaybaha ugu waaweyn; maanta, sida aad ogtihiin, ciidanku waxa uu jooga meel qiyaastii 50 km u jirta Garoowe, xadkeennuna waa la wada ogyahay.
- Sidoo kale, aagga Ceerigaabo, ciidankeennu waxa uu joogaa Dhahar oo 28 km u jirta laamiga; waxa kale oo uu joogaa ilaa Xalin, iyo Yube oo 50 km u jirta Badhan. Waajibaadkii markaa, wax badan—qiyaastii 30% haddii aanay ka badnayn—waan gudannay.

Arrimaha beelaha gobollada bari ee Sool iyo Sanaag marka la eego, Ciidamada Qaranku ayaa ka hawlgala, maadaama Boolisku aanu ku badnayn Ceerigaabo. Sidaa awgeed, labadaas gobolba waxa ka hawlgala Ciidamada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland. Dagaallo badan oo beelahaas ka dhaca annagaa hawshooda qabanna; Guddoomiyuhuna waa u joogay. Ciidamada Qaranku way kala dhexgalaan, wax badan ayaannuna ku guulaysanay dagaallo badan oo meelo kala duwan ka dhacay, hadday Ceel-Afweyn tahay ama meelo kale; hawlo badan oo ay Boolisku qaban lahaayeen annagaa qabannay.

Marka laga hadlo aafooyinka, galbeedka duufaantii ka dhacday wax weyn ayaannu ka qabannay. Anagoo hawshaas ku jirna, waxa ciidanka u muhiima in tababar la helo. Waxaan tababarka ka bilownay Itoobiya sannadkii 2004-tii, annagoo ka bilaabnay tababbarka raggii jabhadaha ahaa si Saraakiil looga dhigo. Waxaan la tashaday Taliyihii Ciidanka intii aan Itoobiya joogay, waxaana layga oggolaaday in halkaas tababar lagu siiyo; sidaas ayaannu u fulinnay tababbarkii ballaadhnaa. Maantana waad arkaysaan Saraakiisha Ciidanka haya.

Waxa kale oo aan ku dadaalnay in, maadaama raggu gaboobayaan, aan u diyaarinno ciidanka rag naga dambeeya. Ardaydii dugsiyada sare ayaannu qaadannay, koorsooyin ayaannu siinay; way dhammeeyeen. Koorsooyin kale ayaannu sii siinay; wayna dhammeeyeen. Maanta, ciidanku waxa uu marayaa meel aad iyo aad u wanaagsan.

Ujeeddadaydu waa in la dhiso aqoonta raggii beddeli lahaa ciidanka; arrintaasna waanu ku guulaysanay, inkasta oo Itoobiya ay na caawiso, haddana guushaas annagaa gaadhnay. Macallimiin badan ayaana maanta inoo jooga.

Waxa kale oo aan tababarro siinay Saraakiil-ku-xigeennada; sida aad dhawaan aragteen, saddex xadhig-layaal ayaannu u dallacsiinnay Saraakiil annagoo siinayna koorsooyin. Saraakiil-ku-xigeennada waxa kale oo aanu barnaa Kulliyadda Darar-weyne, maadaama ay laf-dhabar u yihiin ciidanka.

Anagoo hawshaas ku jirna, haddana tababbarkii caadiga ahaa ayaan sii wadnaa si ciidanku tayo u yeesho. Waad ogtihiin, inkasta oo caqabado jiraan, haddana baahiduna way jirtaa; baahida ciidankuna mar walba waxay la jaanqaaddaa awoodda Qarankeena.

Idinka oo ah Golaha Wakiillada ayaad noo dadaasheen, sidoo kale Dawladdu way noo dadaashay; mushaharkii ciidamada waxaad u kordhisaan boqolkiiba 7%. Inkasta oo sidaas ay tahay, haddana baahidii way taallaa halkii. Anagoo aan waxba laga hagran haynta, waan ku qanacsannahay. Waxaannu aaminsannahay in marka wax naloo kordhiyo aanan la illoobayn, ciidankana laga war-hayn doono. Annagana, anagoo aan waxba ku xidhin, difaaca iyo ilaalinta Qaranka waa waajib na saaran; inta naga hadhsanna waxaan rajaynayaa inaan fulin doono wakhti aan dheerayn, anagoo raacayna siyaasadda Dawladda iyo shuruucda ay dadku dhigteen. Haddii aad su'aalo qabtaanna, waad i waydiin kartaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida; Gaashaanle Sare Saleebaan Muuse Xasan: - Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Waxaan salaamayaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, Shir-guddoonka Golaha, xubnaha Golaha Wakiillada, iyo dhammaan xubnaha halkan maraya ee ka tirsan Wasaaradda Gaashaandhigga, oo uu ugu horreeyo Wasiirka Gaashaandhiggu. Intaa ka dib, haddii aan ku soo dhawaado, Wasiirku wax buu ka taab-taabtay arrimaha maxkamadaha ciidamada iyo xeer-ilaalintooda, aniguna wax yar ayaan ka sii taabanayaa.

Maxkamadaha iyo xeer-ilaalintooda waxa la sameeyay sannadkii 1994-kii, waxaana lagu sameeyay xeer Madaxweyne. Markaas waxay ka koobnaayeen Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Darajada 1aad ee Galbeedka, halka Barigana ay isla Maxkamadda Galbeedku xukumi jirtay oo u tegi jirtay. Muddo ka dib, markii ay meelahii kala dheeraadeen, ayaa dib loo habeeyay, waxaana la go'aamiyay in Barigana loo dhiso Maxkamad Darajada 1aad. Sidaas darteed, waxa noqday laba maxkamadood: mid fadhigeedu yahay Burco, midna Hargeysa; labadaasna xadka kala baxa waa Sheikh, marka Sheikh laga baxona oo xaggaas loo kaco, Burco ayaa xukunta.

Maxkamaduhu, ama bahda garsoorka ciidamada, sida uu hore u sheegay, waxay ku aas-aasan yihiin Qodobbada 90aad, 100aad iyo 104aad ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland. Maadaama ay maxkamadahani yihiin maxkamado gaar ah, haddana waxay wax la wadaagaan maxkamadaha caadiga ah marka laga hadlayo xeerka ciqaabta guud; hase yeeshee, iyaga waxa u gaar ah xeerka ciqaabta ciidamada wakhtiga nabadda iyo marka dagaalka. Sidaas awgeed, xeerarkaasi waa laysku dabaqaa, ismana diidaan.

Waxa marar badan la isweydiyaa, oo dadweynuhuna isweydiiyaa, maadaama ay maxkamad ciidan tahay: maxaa keena in dad shicib ahi soo dhex galaan, maxaase loogu baahdaa?

Maxkamaddu, asal ahaan, marka ciidan loo baahdo, waxay xukuntaa dhammaan dadka darajooyinka qaata ee gala dambi. Waxa kale oo ay xukuntaa dadka shicibka ah ee

dambiga kula gala xubnaha ciidamada; qofkaasna waxa laga soo jiidayaa dhinaca ciidamada, waxana uu noqonayaa mid ay xukunto maxkamadda ciidamada. Waxa kale oo ay maxkamadda ciidamada qaaddaa qof kasta ama koox kasta oo ka soo horjeeda Jamhuuriyadda Somaliland oo hub qaadata. Sidoo kale, wax kasta oo u eg hawl ciidan way qaaddaa.

Marka la soo ururiyo, maxkamaddu had iyo jeer way iska ilaalisaa, wayna ka digtoonaataa xadgudub kasta, ha ahaado mid ay galaan ciidamada ama dadka shicibka ah. Had iyo goor waa la maqlaa maxkamadaha oo racfaan loo haysto ama lagu dooddo waxa ay sameeyeen; hase yeeshee, weligeed lama maqal maxkamadaha ciidamada iyadoo lagu eedeeyay inay xadgudub sameeyeen, lagumana qorin warbaahinta, idaacadna lagama maqal. Taasina waxay daliil u tahay inay had iyo jeer ka taxaddaraan wax kasta oo xadgudub ah.

Tusaale ahaan, haddii aan dib ugu noqono sannadkii dhawaa ee ina dhaafay, 2021-kii, dambiyada ama dacwadaha maxkamadda soo galay gobollada Bari waxay ahaayeen 87 kiis, kuwaas oo 16 ka mid ahi ahaayeen dilal, dadka la dacweeyayna waxay ahaayeen 105 qof. Maxkamadda Gobollada Galbeedka, dacwadihii soo galay waxay ahaayeen 109 kiis, kuwaas oo 3 ka mid ahi ahaayeen dilal, inta kalena waxay ahaayeen dambiyo caadi ah. Dambiyadaasi waxa ka mid ahaa: dhaqan-xumada labada jinsi, mudaharaadyo noocyo kala duwan leh, dilal, amar-diido, tuugo, maxaabiis la sii daayay, jid-gooyo, awaamiirta ciidanka oo la qaadan waayo, dad ciidan la qabsaday, diin lagu xadgudbay, jaajuusnimo, iyo dambiyo kale oo caadi ah oo bini'aadamku galo, sida sakhradda iyo askari shaqadiisii ku xadgudbay, iyo wixii la mid ah.

Haddii aan soo gaabiyo si aan wakhtiga u ilaaliyo, hawlaha maxkamaddu sidaas ayay u kala qaybsan yihiin, waana sidaas sida ay u kala duwan yihiin. Had iyo jeerna waxaan ku dadaalnaa in aan gudanno waajibaadkayaga; dadaalkuna diintu way banaysay. Qofka waxa lagu yidhaahdaa: haddii uu dadaalo oo uu xukumo, laba ajar ayuu leeyahay; haddii uu dadaalo oo uu gafona, hal ajar ayuu leeyahay. Intaas ayaan ku soo koobayaa. Asalaamu Calaykum.

Xeer-ilaaliyaha ciidamada: Cali Maxamed Faarax:- Marka hore, waxaan salaamayaa Shir-guddoonka Golaha, Mudanayaasha sharafta leh ee halkan fadhiya, Wasiirka Gaashaandhigga, Taliyaha Ciidanka Qaranka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida, dhammaan Ku-xigeennada Xeer-ilaaliyaha Ciidamada Qalabka Sida, Agaasimaha Guud, iyo dhammaan shaqaalaha Golaha ee halkan fadhiya. Dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka, Asalaamu Calaykum.

Intaa ka dib, sharaf bay noo tahay inaan Golaha hortiisa imaanno; waa fursad qaali ah, sida aan aaminsanahay. Haddaba, waxaan idiin soo bandhigi doonaa warbixin ku saabsan doorka xafiiska xeer-ilaalintu ku leeyahay dambiyada ka dhaca gudaha ciidamada.

Marka ugu horreysa, xafiiska xeer-ilaalintu waxa uu qaabilsan yahay dunuubta ay galaan ciidamada qalabka sida dhammaantood. Xafiisku waxa uu u qaybsan yahay laba qaybood: **wakhtiga nabadda** iyo **wakhtiga dagaalka**; labadaa qayboodba xafiiska xeer-ilaalintu wuu u qaabilsan yahay. Sida la sheegay, xafiiska xeer-ilaalinta waxa la aas-aasay sannadkii 1994-kii, waxaana lagu aas-aasay Qodobbada 100aad iyo 104aad ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Qaab-dhismeedka xafiiska xeer-ilaalintu waxa uu ka kooban yahay saddex qaybood: **Xeer-ilaaliyaha Guud**, **Ku-xigeennadiisa Gobollada Bari**, iyo **Qaybta Gobollada Galbeedka**. Waxa kale oo jira kaaliyayaal ka shaqeeya xafiiska xeer-ilaaliyaha. Sidoo kale, waxa jira laba wakiil oo hoos yimaadda Xeer-ilaaliyaha Guud, kuwaas oo ka hawlgala Awdal, Salal iyo Ceerigaabo, si ay u qaabilaan dambiyada ka dhaca ciidamada, una fududeeyaan shaqada maadaama dhulku kala fog yahay. Labadan wakiil waxa loo sameeyay si ay shaqada u sii wadaan, sharciguna wuu u fasaxayaa. Magacaabista Xeer-ilaaliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida iyo Ku-xigeennadiisuba waxay ku yimaaddaan awoodda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, sida uu tilmaamayo Qodobka 90aad ee Dastuurka Qaranka.

Marka laga hadlo habraaca marka dambiyada ay galaan ciidamadu yimaaddaan, annagoo ka duulayna Qodobka 70aad ee Xeerka Ciqaabta, marka gefku yimaaddo waxaannu samaynaa hubin (checking). Sida uu sheegayo Qodobka 184aad ee Habka Ciqaabta, waxa la hubiyaa in marag loo hayo iyo in kale; sidoo kale, sida uu tilmaamayo Qodobka 172aad ee isla xeerkaas. Marka hubinta la sameeyo, haddii aannu ku qanci wayno, dib baanu u celinaynaa annagoo nidhaahna: "Kiiska ha la sii baadho, waxyaabaha qaar ha la beddelo, waxyaabaha kalena ha la keeno."

Haddii aannu ku qanacno oo falkaasi noqdo mid sharcigu oggol yahay in la sii wado, waxaannu u gudbinaa Maxkamadda Darajada 1aad, annagoo dalbanayna in gar loo furo, eedna la sameeyo, eedaysanahana xabsiga loo diro, sida ku cad Qodobbada 71aad iyo 75aad. Waxa kale oo la cayimaa maalinta la dhegaysanayo, anagoo maxkamadda ka codsanayna. Sidaas ayaanay dacwaddu ku bilaabataa. Kadibna waxaannu diyaarinaynaa maragyadii, iyadoo shuruudaha sharcigu maraayo ilaa Maxkamadda Sare ee Racfaanka, halkaas oo ay dacwaddu gaadho ilaa dhammaadkeeda.

Haddii ay dhacdo in galka dacwadeed uusan halkiisii marin ama uu xeerku faqsan yahay, waxaannu ku talinaynaa in dacwadda la laalo, annagoo ka duulayna Qodobka 112aad, eedaysanahana xorriyaddiisa loo celiyo. Tani waxay dhacdaa marka aan lagu qancin ama khilaafkii la soo gabagabeeyo. Dacwaddu waxay martaa nidaamkan sharciyeed iyadoo la adeegsanayo Qodobbada 12aad, 114aad, 163aad iyo 119aad. Marka ay noqoto racfaan, waxa la adeegsanayaa Qodobbada 210aad iyo 214aad; fulintuna waxay dhacdaa marka dacwadda dhammaato oo dhammaan jaranjaradii ay soo afjarmato, sida ku cad Qodobka 248aad ee Xeerka Habka Ciqaabta.

Mudanayaal, aad baanu ugu dadaalnay inaanan maxkamadda u gudbin gal danbe, annagoo ilaalinayna xuquuqda askariga iyo muwaadinka labadaba. Waxaannu ka taxaddarnaa inaan gal qaldan maxkamadda u gudbin; xeer-ilaalintuna waa albaabka laga galo maxkamadda. Annagoo arrintaas ku dadaalayna, had iyo jeer waxaannu kula xisaabtannaa cidda wax baadhista samaysa. Waxa kale oo aanu sameynaa kormeer joogto ah oo ku saabsan maxaabiista rasmiga ah ee xabsiyada ku jira.

Intaas oo dhami waa habraaca uu maro gal dacwadeedka, laga bilaabo xeer-ilaalinta, maragga, ilaa qareenka. Qareenku waa inuu goob-joog ahaadaa marka dacwad la qaadayo; dacwad qareen la'aan ah ma dhacdo, si xuquuqdu u sugnaato. Intaasi waa warbixinta ku saabsan habka uu galku maro iyo doorka xafiiska xeer-ilaalintu ku leeyahay.

Waxaan hadda u gudbi doonaa duruufaha ku gadaaman xeerarka aynu maanta ku dhaqanno. Maanta, annagoo hortaagan Golaha Wakiillada, waxaan ka faa'iidaysanayaa fursaddan inaan ka hadlo xeerarka aynu ku dhaqanno, kuwaas oo ay jiraan dhowr xeer, marka laga reebo kii xilligii Siyaad Barre.

Waxaan soo jeedinayaa, aadna idiinka codsanayaa, in dib-u-eegis lagu sameeyo xeerarka aan ka hadlayo, gaar ahaan in ciidamada lagu daro, maadaama ay yihiin ciidan gaar ah. Waxa kale oo aan si gaar ah u soo jeedinayaa in **Ciidanka Dab-damiska** loo sameeyo xeer u gaar ah, maadaama hadda lagu dhaqo xeerkii hore ee xilligii Siyaad Barre, kaas oo aan ahayn xeer idinka ka yimi. Waxaan codsanayaa in xeerarkaasi dib loo habeeyo si ay cadaaladdu u sugnaato.

Dunuubtu way dhacaan; sida Guddoomiyuhu sheegay, ciidamada way ka dhacaan dambiyo, oo ay ku jiraan dilal. Si kastaba ha ahaatee, ma jiro dil mushkilad inoo reebay, maadaama mid kasta uu maray nidaamkii sharciga ahaa: labada darajo ayuu maray, qareen buu yeeshay, racfaan buu maray. Hadda wax mushkilad ah oo taagan ma jiraan; Ilaahay ayaana mahadda leh. Intaas ayaan ku soo gaba-gabaynayaa, aad baad u mahadsan tihiin.

Agaasimaha Guud ee W. Gaashaandhigga: Mr. Maxamed Caynab:- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland oo uu ugu horreeyo Guddoomiyaha Golaha iyo Ku-xigeennadiisa, dhammaan Xildhibaanada Golaha, Shaqaalaha Golaha Wakiillada, Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Saraakiisha Ciidanka Qaranka oo uu ugu horreeyo Mudane Sareeye Gaas Nuux Ismaaciil Taani, madaxda garsoorka Ciidamada Qaranka oo uu ugu horreeyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada, Xeer-ilaaliyaha Guud, Guddoomiyaha Maxkamadda Darajada 1aad, Ku-xigeennada Xeer-ilaaliyaha, iyo Saxaafadda—dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calaykum.

Waxaan halkan idiin soo gudbinayaa warbixinta Wasaaradda Gaashaandhigga Somaliland. Haddii Ilaahay yidhaahdo, qaab-dhismeedka Wasaaradda Gaashaandhigga waxa uu ka kooban yahay saddex waaxood oo waaweyn, sida Wasiirku hore u sheegay: Agaasinka Guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliska Guud ee Ciidanka Qaranka, iyo Garsoorka

Ciidamada Qalabka Sida. Qayb waliba waxay u sii kala baxdaa waaxo. Haddii aan ku hormaro Qaybta Agaasinka Guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga, anigoo ah Agaasimaha Guud, waxay ka kooban tahay **8 waaxood**.

- ❖ Waaxda maamulka iyo lacagta
- ❖ Waaxda hawl-gabka naafada iyo daryeelka ciidamada
- ❖ Waaxda qorshaynta iyo siyaasadda wasaaradda
- ❖ Waaxda xidhiidhka ciidamada iyo Wasaaradda Gaashaandhigga
- ❖ Waaxda hawlaha miinada.
- ❖ Waaxda abaabul-ka-saarka
- ❖ Waaxda cududda shaqaalaha
- ❖ Waaxda xidhiidhka dadweynaha

Tirada guud ee shaqaalaha Wasaaradda Gaashaandhiggu waa **252 shaqaale**, marka lagu daro Agaasimaha Guudna waxay noqdaan **253**. Tirada guud ee garsoorka Ciidamada Qalabka Sida waa **20 xubnood**. Tirada guud ee naafada, agoomaha iyo hawl-gabka waa **4,082 qof**. Waxa kale oo jira tiro darajo-bixin ah oo ka kooban **10 qof**. Hay'adaha Wasaaradda Gaashaandhigga kala shaqeeya arrimaha tababarada iyo latalinta waxa ka mid ah **Adan Smith** iyo **Adal Travels**.

Waaxda maamulka iyo lacagta;- Waaxda maamulka iyo lacagta ee Wasaaradda Gaashaandhiggu waxay u xil-saaran tahay hirgelinta siyaasadaha iyo habraacyada maaliyadeed, diyaarinta iyo isku-dubaridka maaliyadda wasaaradda, iyo joogtaynta ilaalinta maaliyadda, iyadoo laga hortagayo kor-u-kac iyo hoos-u-dhac maaliyadeed. Miisaaniyadda guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga waa **47,125,494,444,000 SH**. Miisaaniyadda mushaharka naafada sannadkii waa **25,981,113,600 SH**, qofkiiba bishii **530,400 SH**, tiradooduna tahay **4,082 qof**. Raashinka ay wasaaraddu siiso sannadkii waxa uu dhan yahay **8,523,900,000 SH**, qofkiiba bishii **175,000 SH**, taas oo u dhiganta **714,350,000 SH** bishii. Kab-miisaaniyadeed ayaa jira oo ah **50 milyan**, guud ahaanna kharashku waa **34,535,130,000,600 SH**. Kharashka hawl-socodsiinta dhammaan mushaharka shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn waa inta ka hadhay **47 bilyan**, oo ah **12,570,480,444,000 SH**. Mushaharka shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn waa **7,621,587,696,000 SH**, halka kharashka hawl-socodsiintuna yahay **4,948,892,748,000 SH**, oo isugu jira kharashaad kala duwan. Tirada gaadiidka waaxdani ka hawlgasho waa **20 gaadhi**, halka shaqaalaha waaxdani ka hawlgalaanna ay yihiin **65 shaqaale.**Waaxda Qorshaynta iyo siyaasadda;- Waxay diyaarisay ama diyaarinaysaa qorshayaal iyo siyaasado ay ka mid yihiin: Qorshaha Wasaaradda (2020 Work Plan). Siyaasadda shanta sano (Five-Year Plan). Qorshaha Horumarinta Qaranka ee ay wasaaraddu ka mid tahay (2022–2027). Diyaarinta heerarka hawl-gabka iyo xaqsiinta.

Waaxda shaqaaluhu waxay u xil-saaran tahay daba-galka shaqada iyo shaqaalaha, iyadoo kantaroolaysa habka shaqo-gelista iyo ka-bixista iyada oo loo marayo nidaamka far-qaadista (fingerprint). Sida hore loo sheegay, tirada guud ee shaqaalaha waa **253**, oo u

kala baxa: **68 A**, **92 B**, **46 C**, iyo **28 D**. Shaqaalaha wasaaradda waxa si joogto ah loogu sameeyaa tababaro ku salaysan hawlaha shaqo iyo baahida loo qabo.

Waaxda naafada iyo daryeelka ciidamada;- Taariikh ahaan, agoomaha, naafada iyo hawl-gabka waxa sannadkii **2012-kii** laga soo saaray Ciidanka Qaranka iyo Booliska, waxaana lagu soo wareejiyay Wasaaradda Gaashaandhigga. Muddo laba sano ah ka dib, waxa talo qaran laga yeeshay in lagu wareejiyo hay'addii **NRC** oo u qaabilsanayd abaabul-ka-saarka; toddoba sano ka dib, sannadkii **2018-kii**, ayaa hay'addii NRC laga soo wareejiyay. Wareegto Madaxweyne ayaa markaas lagu soo wareejiyay Wasaaradda Gaashaandhigga, ilaa maanta naafada, agoomaha iyo hawl-gabkaasi waxay hoos yimaaddaan Wasaaradda Gaashaandhigga.

Tirada guud ee naafada iyo agoomaha waa **4,082 qof**, kuwaas oo ku kala sugan gobollada, laguna kala saaray Boolis iyo Ciidanka Qaranka. Haddii aan ku horrayno Booliska, tirada naafada, hawl-gabka iyo agoomaha waa **892 qof**: Gobolka Maroodi-Jeex **608 qof**, Togdheer **132 qof**, Awdal **85 qof**, Saaxil **20 qof**, Sanaag **37 qof**, iyo Sool **10 qof**. Naafada iyo hawl-gabka Ciidanka Qaranka tiradoodu waa **3,190 qof**: Maroodi-Jeex **1,726 qof**, Togdheer **1,342 qof**, Awdal **122 qof**. Guud ahaan, **3,190** waa Ciidanka Qaranka, **892** waa Boolis, dhammaantoodna waa **4,082 qof**.

Waaxda miinada;- Hay'adihii madaxbannaan ee **ISMAAD**, hay'addii wax-ka-qabashada miinada iyo waxyaalaha qarxa, iyo **PNA** oo ahayd hay'addii miino-saarka Qaranka, laga bilaabo sannadkii **2018-kii**, ayaa digreeto Madaxweyne loogu soo wareejiyay Wasaaradda Gaashaandhigga, waxayna ka mid noqdeen waaxyaha wasaaradda.

Waaxda hawlaha miinada ee Wasaaradda Gaashaandhiggu waxay u xil-saaran tahay isu-duwidda waxqabadka hawlaha miinada, fududayntooda, maamulka iyo falanqaynta xogta, qorshaynta hawlaha, iyo maaraynta tayada, iyadoo la hubinayo tayada shaqada iyo shaqaalaha miinada. Waxa kale oo ay ka shaqaysaa wacyigelinta khatarta miinada, sahanka, kooxaha bur-burinta waxyaalaha qarxa, wareejinta dhulka la sifeeyay, iyo xogta shilalka miinada iyo khasaaraha ka dhasha. Shaqaalaha waaxdu waxa ay ka kooban yihiin **45 qof** oo ku kala sugan gobollada, waxaana ka hawlgala laba kooxood oo wacyigelin ah iyo laba kooxood oo tayo-hubin ah. Waaxda hawlaha miinadu waxay gacan-saarka la leedahay hay'adda **HALO Trust**, taas oo shaqaalaha siisa tababaro, iyadoo Wasaaradda Gaashaandhigga ay haysato laba qaybood oo muhiim ah oo miino-baadhayaal ah. Waaxda xidhiidhka ciidamada;- Waaxdani waxay u xil-saaran tahay xidhiidhka u dhexeeya ciidamada iyo Wasaaradda Gaashaandhigga.

Waaxda xidhiidhka dadweynaha;- Waxay u xil-saaran tahay hubinta iyo ilaalinta sirta, maaraynta baraha bulshada (social media), xidhiidhka dadweynaha, iyo la-kulanka deegaannada. Waaxda abaabul-ka-saarka;- Waxay u xil-saaran tahay xaqsiinta iyo hub-ka-dhigista ciidamada, sida kuwa hawl-gabka noqday, iyo wixii u baahan in dib-u-dejin loo sameeyo. Mudanayaal, dhammaantiin waan idin wada salaamayaa. Wasiirka Gaashaandhigga Cabdiqani Maxamuud Caateeye;- Mudane Guddoomiye iyo

Mudanayaal, marka hore waad mahadsan tihiin. Waxaan idinka mahadcelinayaa sida aad noo dhegaysateen. Waxaan rajaynayaa in marar kale oo badan aynu iska xog-waraysan doono hawlaha aan Qaranka u hayno. Wixii su'aalo ah ama faahfaahin ah, si wadajir ah ayaannu diyaar ugu nahay. Guddoomiye Siciid Mire Faarax (Giire);- Aad ayaan idiinku mahadnaqayaa Wasaaradda ahaan. Hadda waxaan bilaabaynaa su'aalihii, waxaana ugu horrayn ku soo dhawaynayaa Mudanaha ugu horreeya. Ku soo dhawoow, Mudane.

Md. Axmed Yuusuf Nuur (Guruuje):-Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Wakiillada Md. Siciid Mire, martida sharafta leh ee inala joogta oo uu ugu horreeyo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, martida kale ee uu ugu horreeyo Taliyaha Ciidamada, iyo dhammaan Golaha Wakiillada—Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu. Waxaan weydiinayaa Wasiirka iyo madaxda kale ee la socota dhowr su'aalood.

**Su'aasha 1aad:-** Sida uu dhigayo Qodobka 104aad, Farqaddiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Ciidanka Qaranka waxa lagu aas-aasaa xeer. Xeerkasi tan iyo markii Ciidanka Qaranka la aas-aasay 2-dii February 1994-kii—oo anigu markaas joogay, Ilaahay mahaddii—ilaa maanta oo aan halkan fadhiyaan, weli ma muuqdo. Wasiir iyo Taliye, waxaan si xushmad leh u weydiinayaa: xeerkii aas-aaska Ciidanka Qaranka ee qeexayay qaab-dhismeedka Ciidanka Qaranka halkee buu idiin marayaa? Ma isku daydeen? Xeerkaa warbixin naga sii.

**Jawaabta 1aad,** Wasiir Cabdiqani; - Xeerka aas-aaska Ciidanka Qaranka horta wuxuu marayaa qabyo-qoraal. Golaha Wasiirrada waanu geynnay sannadkii hore, welina Golaha ayaan ka sugaynaa.

**Su'aasha 2aad:-** Sida uu dhigayo Qodobka 123aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Farqaddiisa 5aad, maxkamadaha ciidamada waxa lagu aas-aasaa xeer gaar ah oo qeexaya waajibaadka iyo qaab-dhismeedka maxkamadda. Sida ay inoo sheegeen Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada iyo Xeer-ilaaliyaha Guud, xeerkasi ilaa maanta ma jiro. Waxaan gaar ahaan weydiinayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare: ma jiraa xeerka maxkamadaha ciidamada Somaliland? Haddii aanu jirin, idinka iyo wasaaraddu ma isku daydeen samayntiisa? Ma bilowdeen? Haddii aanu jirinna, maxaa idiin qorshaysan?

**Jawaabta 2aad** Wasiir Cabdiqani; - Xeerka aas-aaska maxkamaduhu isaguna waa qabyo-qoraal. Saddex sano ayaan wasaaradda joogay, xitaa ka hor intaanan imanba wuu jiray. Kan ciidamada anigaa geeyay Golaha, maxkamadahana waa noo diyaarsan yihiin; faahfaahintana waxa bixin doona Guddoomiyaha Maxkamadda Ciidamada.

**Su'aasha 3aad:-**Tan oo ah heer wasaaradeed, waxaan weydiinayaa: warbixinta Wasiirku inoo soo bandhigay kuma jirin samaynta siyaasadda guud ee difaaca Qaranka. Aduunyada, waddan walba wuxuu leeyahay siyaasad difaac. Wasiir, siyaasadda difaaca ee

waddankeena maxaad Golaha la wadaagi kartaa, adigoo awood u leh inaad dalbato in saxaafaddu dibadda u baxdo haddii ay jiraan arrimo sir ah?

**Jawaabta 3aad Wasiir Cabdiqani; -Arrinta** waajibaadka waan ku daray warbixintaydii, maadaama waajibaadka aan anigu hayo ay yihiin shaqooyinka ay qabtaan waaxyahayagu. Xeerka ka horreeya marka hore waa siyaasadda; siyaasaddana waanu diyaarinay. Wax walbana meel walba lama wadaagi karo, balse waanu diyaarinay siyaasadda difaaca Qaranka Somaliland.

**Su'aasha 4aad: -**Tan afraad waa casriyeynta mushahar-bixinta ciidamada. Ciidamadeennu waxay mushaharka u qaataan hab qadiimi ah, halka shaqaalaha kale ee dawladda iminka la casriyeeyay nidaamka mushahar-bixintooda oo laga saaray caaglayaasha. Ma idiin qorshaysan tahay inaad casriyaysaan habka mushahar-bixinta ciidamada?

**Jawaabta 4aad Wasiir Cabdiqani; -** Haddii aan ka hadalno casriyeynta mushaharka, Somaliland marba meel bay taagnayd, marna way burbursanayd. Maanta se horumar la taaban karo ayay ku jirtaa. Haddii aad eegto dhanka isgaadhsiinta, waxaynu kaga horreynaa dalal badan oo Afrika ah; 4G-ga waxa innagu yimid 2014-kii, dalal badanna wakhtigaas may gaadhin. Maanta waxaan haynaa naafa ka badan 4,000 qof, kuwaas oo yimaada xeryaha si ay lacagta u qaataan; waxaan doonaynaa in qof walba lacagtiisu ugu dhacdo lambarkiisa.

**Su'aasha 5aad:-** Su'aasha ugu dambaysaa, anigoo ku amaanaya Ciidanka Qaranka sugidda xuduudaha Somaliland, Mudane Taliye Guud, xuduuduhu ma aha dhul kaliya; cir iyo badba way ku jiraan. Sida aynu ognahay, hawadeenna waxa sheegata waddanka aynu is-haysanno ee Soomaaliya. Maxaa idiin qorshaysan difaaca hawada?

**Wasiirka Gaashaandhigga;-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye, Mudanayaal, iyo Xildhibaanka su'aasha na weydiiyayba—Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu. Horta isla xisaabtanku waa arrin wanaagsan; waxa nala weydiiyayna waa wax aan anagu hayno.

**Jawaabta 5aad Wasiir Cabdiqani; -** Cirku iyo baddu labaduba waxay hoos yimaaddaan xeerar iyo siyaasado; xeerarka kuwoodaana waa lagu hadlayaa ama waa laga dhex helayaa. Intaas ayaan ku soo koobayaa jawaabihii su'aalaha.

**Md. Cabdullaahi Yuusuf Axmed: -** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka Golaha Wakiillada, Wasiirka, Taliyaha Ciidamada, iyo Saraakiisha kala duwan ee Qaranka—Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu.

Mudane Wasiir, sida aynu isla ognahay, xagga casriyeynta mushaharka—oo aan ku amaanayo in Ciidanka Dab-demisku hormuud ka yahay—waxaan kugu dhiirrigelinayaa inaad la jaanqaaddo hawsha ay wasaaraduhu wada mareen ee bangigu wado ee casriyeynta mushahar-bixinta.

**Su'aasha 1aad:-** Wasiir, hay'adaha qaranka ama dawladnimada Somaliland waxay ka kooban yihiin saddex dhardhaar, mid walbana Dastuurku ayuu jideeyey waajibaadkiisa. Golaha Wakiilladu awoodo buu leeyahay; marka uu cid u yeedhona waa waajib inay timaaddo, sida Dastuurka iyo Xeer-hoosaadkuba caddeeyeen. Mudane Wasiir, waxaad ka mid ahayd saddex Wasiir oo Goluhu u yeedhay oo aan iman, Shir-guddoonkana aad raalli-gelin u dirtay adigoon iman. Maanta se waxaad hortimid Golaha. Yeeristii Guddida Arrimaha Guduhu waxay ku saabsanayd sidii xeerarka qabyo-qoraalka ah loola shaqayn lahaa; haddana wada-shaqayn baa jirta, waxbana ma soconayaan. Waxaan doonayaa inaad Golaha u caddayso wixii dambe, si mowqifkaagu u caddaado.

**Jawaabta 1aad – Wasiir Cabdiqani:** Xildhibaan Cabdillaahi, aad baad u mahadsan tahay. Arrinta mushaharka oo hore looga hadlay, haddana kusoo noqotay, waan iftiimiyey, waana dhamaystiri doonnaa.

**Su'aasha 2aad:** Tan labaad, Xildhibaanadu waa xildhibaanadii dalka; waxay metelaan Ciidamada Qaranka iyo shacabweynaha. Xeerarka dalka ee dhaqan-galka ahna way ku qoran yihiin. Waxaa dhacda in mararka qaarkood taliska laga celiyo xildhibaanada, laguna yidhaahdo "ma gelaysaan", iyadoo hawluhu socdaan oo ay hawl ciidan tahay, maadaama askar ama saraakiil ku jira cusbitaallada ay ku soo qaylinayaan. Maanta adiga iyo Taliyihii ayaad joogtaan; xeerarka dhaqan-galka ahna waxay sheegayaan in xildhibaanada aan laga celin karin xafiisyada dawladda. Marka xeer dhaqangala ah la jebiyo oo meelo layska hor istaago, taasi waxay noqonaysaa sharci-jebin. Taas ayaan doonayaa inaad Mudanayaasha u caddaysaan.

Qodobka ugu dambeeya ee aan kaga baxayo waa talo-soo-jeedin. Mudane Wasiir iyo Mudane Taliye, Qarankeennu waa mid da'yar oo curdin ah, welina isku-filnaansho buuxda ma gaadhin. Ciidamada Qaranku waa dad; qofkuna wuxuu ku shaqeeyaa moral. Sidaa awgeed, waa in aad ilaalisaan moral-kooda—hadday caafimaadkooda tahay, hadday carruurtooda iyo noloshooda tahay. Annagana wixii dhankayaga ah waan idinkala shaqaynaynaa, Dastuurkana wada ilaalinaynaa.

**Jawaabta 2aad – Wasiir Cabdiqani:** Arrin kale oo aan rabaa inaan si cad u sharraxo waa: haddii aad heshaan meel nalagu diiday, waan ka jawaabi doonnaa. Yeerista xubnaha Golaha Wasiirrada waa arrin dastuuri ah, sida Dastuurku sheegayo, waana in la is ixtiraamaa. Guddoomiyuhu hortayda ayuu fadhiyaa; warqad buu ii soo qoray. Maalintii ugu horreysay waxay ii timid Salaaso; waan la hadlay, waxaanan iri, "Xildhibaane, waanu kala maqanahay." Taliyuhu wuxuu ku maqnaa Laascaanood.

Wuxuu yidhi, "Xildhibaanadu waa isbarasho." Waxaan iri, "Isbarashadu waa caadi, balse waxaan doonaynaa inaanu isku dhan u is-xog-waraysanno." Markii labaad, Wasiirku wuxuu ii soo qoray maalin ku beegnayd dhalashada Nebiga (SCW), waana maalin aan la shaqayn.

Hadalka gunaanadkiisa, waxaan ku darayaa in wixii hadha ee dambe si wanaagsan aynu u wada shaqayno. Arrinta ah in taliska ciidanka layga celiyey—anigoo Wasiir ah—way dhacday. Waxa kale oo dhacday in xildhibaan laga soo doortay Caynaba wasaaradda laga celiyey. Markii uu xildhibaanku ii yimid, ciidankii dhammaantood salaam bay siiyeen. Mar walba idinka ayaa naga mudan sharaf; arrintani ma ahayn mid badheedh ah. Xildhibaan waa matalaadda dalka oo dhan; sidaas darteed waa in la wada shaqeeyaa, laysuna dulqaataa.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-Jilic):** Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu. Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliyaha, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadda—Asalaamu Calaykum. Su'aalahaygu ma badna.

Waxaa jira dhalinyaro marka ay arkaan sharafta ciidanka aad u qiirooda oo jecel inay ku biiraan ciidamada kala duwan ee dalka. Xidhiidhka Dadweynaha, Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliyaha, waxaan weydiinayaa: maxaa platform ah oo u yaalla dhalinyaradaas qiirooday ee doonaysa inay ku biiraan ciidamada balse aan nasiib u yeelan? Sidee bay wasaarad ahaan ugu fududaan kartaa ama ugu suurtageli kartaa inay wasaaradaha iyo ciidamada ku biiraan, si anshaxooda iyo akhlaaqdooda loo sugo?

Tan labaad, ciidanku mararka qaarkood way ka qayb-qaataan wax-soo-saarka, gaar ahaan marka aan dagaal lagu jirin; si weyn bay uga qayb-qaataan arrimaha wax-soo-saarka. Su'aashaydu waxay tahay: arrimaha wax-soo-saarka Qaranka, sidee bay ciidanku diyaar ugu yihiin inta suurtagalka ah? Sidee loo samayn karaa reserve suuqa ku jira oo maalinta loo baahdo la heli karo?

Su'aashayda ugu dambaysa: kiisaska ka dhacay Bariga waxay ahaayeen 87, Galbeedkana 109; marka 19 waa dilal. Immisa ayaa dilkaa lagu fuliyey, immisa ayaana hadda la hayaa? Sidee ayaan warbixin uga heli karnaa kiisaskaas, maadaama ay noocyo badan yihiin? Waxaan soo jeedinayaa in qoraal ahaan, Baarlamaan ahaan, aan u helno—ma suurta-gal baa?

**Taliyaha Ciidanka Nuux Taani – Jawaabta Kowaad:** Arrinta ciidamada, hore ayaa loo sameeyey shaqo qaran. Shaqada Qaranka, cid kasta oo u diyaarsan oo ka soo baxda iskuullada iyo jaamacadaha, waxaan ka qaadannaa qaybta nagu soo aaddan, waxaanan ku qaadannaa laba xiddig-layaal.

Inta kale ee aan shaqo qaran gelin, inkasta oo ay hadda yaraatay, wixii engineers, doctors ama saraakiil ah ee Itoobiya laga helo—maadaama ay tahay meesha keliya ee wax laga heli karo—waan soo raadinnaa. Ardayda ka soo baxda secondary-ga ayaan soo ururin jirnay; shahaadooyinkooda Wasaaradda Tacliintu ayaa guddi u saari jirtay imtixaanka; wixii baasay ayay Wasaaradda Tacliintu noo soo gudbin jirtay, sidaas ayaanna Itoobiya ugu diri jirnay—taas oo ahayd ka hor intaan shaqada qaran la bilaabin. Hadda haddaan ka helno koorsooyin Itoobiya, sidaas ayaan u maraynaa.

Wixii kale ee shaqo qaran naga soo aadda, Kulliyadda Saraakiisha ayaan gelinnaa lix bilood; markay dhammeeyaan waan soo qaadannaa. Toos uma qaadanno qof aan dable noqonayn; ninka secondary-ga ah haddii uu dable noqonayo waan qaadannaa oo Kulliyadda ayaan gelinnaa, laakiin haddii uu sarkaal doonayo, waddadii saxda ahayd ayuu mariyaa.

Arrin kale oo aan ku darayaa waa mushaharka. Nidaamka la soo hadal qaaday waa mid wanaagsan. Waxaa jira 3,003 oo ciidan beeleed ah oo aanu ciidan siinay duruufo keentay, si aan amniga u sugno; waana khasab in sidaas loo sameeyo. Ma aha tiro kooban; meel kasta oo ay joogaanba waanu ognahay. Laakiin ciidamada kale waxay leeyihiin faylal lagu kantaroolo; marka ay dhowr bilood joogaanba waa la hubiyaa inay wax ka baxeen iyo in kale. Sidaa darteed, nidaamka la sheegay weli heerkii la doonayay ma gaadhin.

**Jawaabta 2aad:** Tan Xildhibaanku sheegayey: haddii aad warqad soo qortaan oo uu Guddoomiyuhu soo maro, Madaxweynaha-na uu soo saxeexo, waanu oggolaanaynaa.

**Jawaabta 3aad:** Tan kale ee wax-soo-saarka: Wajaale beero buu leeyahay; adiguna reer Gabiley baad tahay. Wax-soo-saarku waa bilow weyn, waanuna koraynaynaa. Dalkeenna, sida aad ogtihiin, deyn iyo deeq midna ma helo; waxaannu ku soconnaa cashuurta dadka laga qaado.

**Jawaabta 4aad:** Tan kale ee ku saabsan xogta dilalka qisaasta: wakhtiyadii dhowaa ilaa **6 dil** baa la fuliyey; inta kalena **qisaas** bay sugayaan haddii labada dhinac ku heshiiyaan.

**Md. Abokor Faarax Warsame:** Shir-guddoonka, madaxda wasaaradda iyo shaqaalaha—waan idin salaamayaa. Anigu laba su'aalood oo gaagaaban ayaan hayaa; labada su'aaloodna bulshada ayay ka yimaaddeen.

**Su'aasha 1aad:** Ciidamo Qaran oo amar lagu siiyey hawlgal ayaa marka wax ku dhacaan—qadarka Eebbe siduu doono ha ku yimaaddee—la yidhaahdaa "reerkiinii baa qaba", halka Ciidanka Qaranka iyo Xukuumadduna aanay qaadin mas'uuliyadda. Marka arrimaha noocaas ah, maxay siyaasaddiinnu tahay, gaar ahaan ilaalinta ehelada iyo amniga labada dhinac, iyadoo ay yihiin Ciidamada Qaranka ee deriska la wadaaga hawlgalka, haddana lagu yidhaahdo "reerkiina baa qaba"?

**Su'aasha 2aad:** Laba askari oo xero wada joogay, mid baa mid kale toogtay; markhaatiyadii way joogaan, labada dhinacna kama heshiin. Qoladii qisaasta lahayd way ku adkaysatay, qisaastuna weli lama fulin, halkaasna amni-darro baa ka dhalan karta maadaama beeluhu is-fara-baxayaan. Arrintan maxaa inaga yaalla? Maxaa hortaagan fulinta qisaasta? Waxaan idinka codsanayaa jawaab qiimo leh.

**Taliyaha Ciidanka:** Xeerka jira waxa uu sheegayaa: haddii askari amar loo diray oo hawl ku jira, wax ku dhacaan, dawladda ayaa qaadda mas'uuliyadda—sharcigaa waa jiraa. Laakiin haddii falka uu askarigu si iskiis ah u sameeyo, taasi waa hawl uu isagu qaadayo. Haddii askari hawl ku jira qof dilo, annagaa bixinayna; haddii shil dhaco, waanu

bixinaynaa. Laakiin fal uu si iskiis ah u galo waan diidnaa. Tan aad sheegaysaan—qof hawl loo diray oo hawshii ku jira wax ku dhacaan—waan oggolnahay, waanan ka jawaabaynaa.

**Guddoomiyaha Maxkamadda Ciidanka Qaranka:** Su'aalaha Xildhibaanku i weydiiyey ee Taliyuhu ka jawaabay ayaan aniguna dulmarayaa.

**Jawaabta 1aad:** Gaadiid wax lagu dilo—ha qalimo ama ha jiidho—waan eegnaa, waanu qiimaynaa sababta iyo qaabka ay u dhaceen; maxkamaddu marka hore way baadhaa. Maalin dhoweyd nin gaadhi ka xayey amar buu ku waday; wuu waday si xawli ah, Taliyihii ciidankuna shir buu ku jiray oo waxba kama maqlin; shil baa dhacay, qof baa dhintay. Arrintaas lama odhan karo "waa askari"—waa fal u baahan qiimayn; dulmi ma fiicna. Qofkaas waan ka fiirsanaa, waddada ugu saxsanna waanu maraynaa.

**Jawaabta 2aad:** Qisaasta: marka qof qof dilo oo aan la heshiin, qisaasta waan fulinnaa; xafiiska Madaxweynaha ayaa la geeyaa. Laakiin tiradu way badan tahay. Marka qofku aanu marin saddexdii hab ee heshiinta, ehelkiisana la weydiiyo, wakhtigu wuu dheeraadaa—taas ayaana sababta.

**Md. Xuseen Ismaaciil:** Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliyayaasha Ciidamada iyo Mudanayaasha kale—Asalaamu Calaykum. Saddex su'aalood ayaan weydiinayaa madaxda halkan joogta.

**Su'aasha 1aad:** Mudane Taliye, waxaad sheegtay in tababarro lagu kordhinayo tayada ciidanka lana geeyo dalal aynu deris nahay. Suurtagal ma tahay in Somaliland yeelato **Military Academy** u gaar ah, si loogu tayeeyo saraakiisha iyo ciidamada, una yaraan ku-tiirsanaanta dalal shisheeye?

**Su'aasha 2aad:** Dhismaha ciidan xooggan wuxuu ku tiirsan yahay agab iyo tignoolajiyad. Soomaaliya waxa la arkayaa casriyeyn ay helayaan iyagoo taageero ka helaya dalal ay iskaashi la leeyihiin. Miyaanay ahayn in Somaliland yeelato istaraatijiyad wakhti fog ah—tababar, agab iyo tignoolajiyad—si ciidamadu awood ugu yeeshaan difaaca xuduudaha, marka laga reebo miisaaniyadda Qaranka oo 60% mushaharka ku baxo?

**Su'aasha 3aad:** Somaliland waxay heshiis la leedahay Taiwan; lixda qodob ee heshiiska mid ka mid ah waa arrimaha ciidanka. Ma jiraan wax iskaashi ama taakulo ciidan oo jira, ama qorshe istaraatijiyadeed oo aad ka war haysaan ama aad ka wada hadasheen?

**Taliyaha Ciidamada Nuux Taani – Jawaabta 1aad:** Mahadsanid Xildhibaan Xuseen. Arrinta **academy**-ga waanu samaynay; Ingiriisku wuu naga caawiyey. Waxay ku taallaa Darar-weyne, waxayna leedahay saddex qaybood; qayb sarakiisha ah waa lagu tababaraa, balse weli wax baa ka maqan—gaar ahaan agabka. Qalabaynta kulliyadda waanu codsannay, balse weli cid na soo jawaabtay ma helin. Rag aqoon leh way joogaan.

**Jawaabta 2aad:** Taiwan xiriir weyn waanu leenahay, balse weli wax muuqda kama arag. Dhanka agabka, waa run in Koonfurta ay magaceenna ku shaqeysteen; waxna lama wadaagno. Annaga ciidamo kala nooc ah ayaa naga maqan—dhakhaatiir, injineerro,

commandos—inkastoo ay jiraan, haddana kuma filna. Haddii aan helno cid na caawisa way isbedeli lahayd. Meelo badan waan la xidhiidhnay, cidina weli nagama jawaabin. Waa inaan ku tiirsanaanno wixii aan heli karno; kharashkuna wuxuu ku xiran yahay miisaaniyadda. Haddii miisaaniyadda la kordhiyo, markaa wax baan soo iibsan karnaa.

**Md. Mustafe Axmed Cabdillaahi (Khayreeye):** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Martida, Wasaaradda, Taliska Ciidanka Qaranka iyo Maxkamadda Ciidamada—ASC. Salaan ka dib, waxaan u mahadnaqayaa masuuliyiintan waajibaadkoodii dastuuriga ahaa ka soo jawaabay. Dhowr su'aalood ayaan qabaa; Mudane Taliye, aad iyo aad baan kuugu mahadnaqayaa.

**Su'aasha 1aad:** Mudane Taliye, dilalka saraakiisha ciidanka ee soo noqnoqday ayaa walaac geliyey shacabka. Ma jirtaa wax-baadhis aad samayseen, maxaase laga qabtay?

**Jawaabta 1aad – Taliye Nuux:** Arrinta saraakiisha waa run—dilal way jireen. Qaar ka mid ah kuwii falalka geystay waa la dilay, qaarna hadda waa dil-sugayaal. Hal nin ayaa baxsaday; sida aan ka war hayno, Xamar ayaa lagu dilay. Inta kale dhammaantood waa la qabtay. Sababo waaweyn ma jiraan; maxkamaddu way ka warqabtaa. Wacyigelin badan ayaannu samaynay, tallaabooyinna waanu qaadnay; qaddarkuna waa halkiis.

**Su'aasha 2aad:** Saraakiil ama askar hawlgal ku dhinta ama u dhinta xanuun Alle ka yimid—sidee loola macaamilaa ubadkooda?

**Md. Axmed Maxamed Hurre (Barkhad): -** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Mudanayaasha Golaha, Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Saraakiisha Ciidanka, gaar ahaan Taliyaha Ciidanka Qaranka, Shaqaalaha Golaha iyo Saxaafadda—ASC. Gole ahaan waxa noo muuqata in aad si fiican isu diyaarisay, dhiirranaan iyo kalsooni badanna aad ku timaaddeen Golaha. Marka hore waan idin mahadnaqayaa, waxaanan jeclaan lahaa in wasaaradaha kalena ay sidaas oo kale u yimaadaan.

**Su'aasha 1aad:** Sida uu Taliyuhu sheegay, waxa waddankeena ka jira ciidan-beeleedyo, wuxuuna sheegay in waxoogaa dhiig-bax ahi jiro. Haddaba, maxaa inaga hortaagan in la qarammeeyo, si ay habraacii ciidanka u galaan?

**Jawaabta 1aad – Taliye Nuux:** Ciidan-beeleedyadu way qarammeeyeen oo ciidanka way ku jiraan, balse maamulka dawliga ahi marba meel ayuu gaadhayay. Mar baanu Berbera gaadhsiisnayn, marna Burco gaadhsiisnayn; sidaas awgeed, maanta maamulka dawliga ahi Taleex weli ma gaadhin, inkasta oo Badhasaab joogay oo wakhti dhaw la gaadhay. Meelo kale oo badanna wakhti dhaw ayuu gaadhay. Haddii aan tusaale u soo qaato Taleex, Karin-Dabayl-weyn ama Karin-Garbood, ciidanka caadiga ahi ma tegi karo duruufo awgeed. In maamulka Somaliland gaadho waxay noqotay lama huraan; markaa deegaannadii waan ka baqanay, balse wakhti ayaa iman doona oo ciidan isku dhafan gaadhi doono. Maleeshiyaadkana tababaro ayaan siinnaa si ay uga mid noqdaan ciidamada.

**Su'aasha 2aad:** Ciidanka Qaranka marka aad eegto, duruufo iyo baahiyo badan ayaa ka muuqda, gaar ahaan dhaqaale iyo hayn. Golahanna waan ugu mahadnaqayaa miisaaniyaddii u dambaysay ee loogu kordhiyay **30%**. Dhanka saadka, duruufo ayaa jira; maxaa sababa duruufahaas?

**Jawaabta 2aad – Taliye Nuux:** Dhanka raashinka ciidanka, waxaanu siinnaa intii miisaaniyadda Qaranka aad nagu ansixiseen; wax ka dheeri ah intaas ma hayno. Sida aad ogtihiin, **24-dollar** ayaa loo qorsheeyay; intaas ayaannu siinnaa. Askari Tukaraq jooga ama Yube jooga ama meelo kale jooga, giraamkiisa halkaas ayaa loogu kariyaa; kan halkan jooga xataa xaaskiisa lama wadaago. Sidaas ayuu waliba reerkiisii uga maqanyahay. Mushaharka uu qaato waad ogtihiin inta uu yahay, haddana sidaas ayay dalka ugu shaqeeyaan.
Sidaas awgeed ayaan idin leeyahay: haddii Ilaahay wax inoo kordhiyo, waan idinla wadaagi doonnaa. Askari waxba kama haro noloshiisii; Qarankan ayuu u huray, qorigiisana isaga ayaa wata.

**Su'aasha 3aad:** Shaqada Ciidanka Qaranku waa difaac. Haddana waxa mararka qaarkood idinka dhex muuqata arrimaha gudaha iyo siyaasadda, ama kulammada axsaabta siyaasadda.

**Jawaabta 3aad – Taliye Nuux:** Sidaan horaba u sheegay, waajibaadka ciidanku waa difaac guud. Mararka qaarkood beelaha waanu dhexgalnaa haddii wax naga furta aan wayno, waayo ciidanku ummadda ayaa iska leh. Marka ummaddii is-qabsato, waanu kala dhexgalnaa—waana waajib. Axsaabta marka Boolisku hawl ku filan waayaan, ama ay naga codsadaan caawin, ayaannu hawlgalnaa. Axsaabta ma kala jeclin; axsaabta waxa ilaaliya Ciidamada Qaranka. Amarkana waxaannu ka qaadannaa dawladda markaas jirta, taas oo dastuuri ah.

**Su'aasha 4aad:** Waxaa jira nidaamka darajo-siinta Ciidanka Qaranka. Aad ayaan ugu mahadnaqayaa in ciidanku darajooyin yeeshaan ama la dallacsiiyo. Habraaca loo maro muxuu yahay? Ma muddada uu ciidanka ka tirsanaa baa? Mise aqoontiisa? Haddii uu maanta darajo qaato, muddo intee le'eg ayuu sugaa?

**Jawaabta 4aad – Taliye Nuux:** Darajada, sidaan horaba u sheegay, askari walba waxa uu leeyahay gal (file) ay ku qoran tahay muddada iyo sannadka uu dallacayo, xil kasta ha joogo. Kuma dallacsiinno aqoon keliya; waxaannu ku dallacsiinnaa muddada uu ciidanka ku jiray. Ma aha dallacsiin iska dhacda; Guddi ayaannu u saarno, iyagaana kala saara galalka (files).

**Su'aasha 5aad:** Waxaa jira gadood marar badan soo noqnoqda oo ay ciidamadu sameeyaan; maxaa u sabab ah?

**Md. Jaamac Abokor Dubde:-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka Golaha Wakiillada, Mudanayaasha Golaha Wakiillada, Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliyaha Ciidamada Qaranka, Guddoomiyaha Maxkamadda Ciidamada, iyo saraakiisha kale—dhammaantiin waan idin salaamayaa, waanan idiin mahadnaqayaa sida xilkasnimada leh ee aad uga soo jawaabteen yeedhmadan, iyo sida aad u diyaar tihiin adigoo madaxnimo idinka muuqato. Mar labaad waan idiin hambalyaynayaa. Wasaaradaha kalena waxaanu u sheegaynaa inay iyaguna sidan oo kale isu soo abaabulaan, iyada oo aan xarag la gelin, su'aalana la isweydiiyo, maadaama danta Qaranka laga shaqaynayo.

Ka gudbid arrimo guud, waxaanu doonaynaa in wixii xeerar ah ee yaalla aynu ka wada shaqaynno, dadajinana—haddii aad si gaar ah noola ballamaysaan iyo haddii kaleba; taasina waa iga xasuusin.

**Su'aasha 1aad:** Waxaan maqlay in Burco laga dhisayo dhakhtar ay leeyihiin ciidamada. Haddii aanu jirin, ma suurto-gelin kartaan?

**Jawaabta 1aad – Wasiir Cabdiqani:** Ugu horrayn, waan kuu mahadnaqayaa ammaanta aad na ammaantay. Marka labaad, dhanka wada-shaqaynta xeerarka, waanu idin kala shaqaynaynaa marka uu Guruuje ka gudbo abtinimo iyo seednimo oo uu heer qaran noqdo.

Idinka ayaa miisaaniyadda dalka haya, sida aad wada ogtihiin. Dhakhtar weyn ayaa laga dhisay xerada Birjeex. Sida uu Taliyuhu sheegayna, marka hore dadka ayaa la tababaraa. Dadka hadda ka shaqeeya dhakhtarka waa dhakhaatiirtii ugu sarreysay jaamacadihii ay ka qalin-jabiyeen ee Itoobiya.

Dhakhtarka Burco mid baa noo yaalla, balse waxa uu u baahan yahay dib-u-habayn iyo ballaadhin. Sannadkii dhawaa waxa miisaaniyadda noogu jiray kab; kabkaasna dhakhaatiir ayaannu ugu yeedhnay. Waxa ugu badan ee loo baahan yahay waa dhakhaatiirta, gaar ahaan marka dagaal dhaco oo dhaawacyo laf-jab ahi yimaaddaan. Sidaas awgeed, waxaanu u baahanahay laba dhakhtar—mid qalliinka ah iyo mid lafaha ah. Waxaanu doonaynaa inaan shaacino, annagoo dhakhtarka ku qancinayna mushaharka iyo gunnooyinka aanu u bandhigi karno; taas ayaana noo qorshaysan.

**Md. Cabdikariin Aadan Cali: -** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Mudanayaasha Wasaaradda Gaashaandhigga, Taliyaha Ciidanka Qaranka, iyo shaqaalaha Golaha—dhammaantiin ASC. Marka koowaad, aad iyo aad ayaan idinku mahadcelinayaa. Sharaf ayay noo tahay in aad nasoo qiimaysaan, idinkoo sharaftii Qaranka huwan, in aad hortayada timaaddaan oo wixii su'aalo ah ee aanu qabno nooga jawaabtaan.

**Su'aasha 1aad:** Sidii uu sheegay Mudane Khayreeye, isla markaana Wasiirku ka jawaabay, anigu uma arko mid na qancisa ama dadka ku qancisa. Arrintii dhawaan ka dhacday magaalada Hargeysa, mid ka mid ah xisbiyada ayaa yimid meel fagaare ah iyagoo leh "waxaanu la hadlaynaa taageerayaashayada", iyada oo aan la arkayn wax fal-danbiyeed

ah. Halkaas waxa hore u ka cayeen dadkii xisbiyadaas ugu sarreeyay. Ciidamadu waxay qaadeen tallaabo aad u xun oo dadkii aad uga fajicisay; waxa la arkayay hablo sharaftooda ilaashanaya oo xijaaban oo ay saraakiishii ugu dambaysay ku tumanayaan. Waxa kale oo la arkayay nimankii "shadow ministers" ka ahaa oo rasaas lagula dhacay, halka ciidamo tababaran oo ka tirsan Ciidanka Qaranku ay jiidhayeen madaxdii xisbiga, ilaa ay dhacday in gaadhigoodii taayirrada laga toogto si ay madaxdu uga badbaadaan.

**Jawaabta 1aad – Wasiir Cabdiqani:** Mudane, marka hore qanaacadu waa mid qofka u gaar ah sida uu u qancayo. Annagoo aan u hadlin si xisbiysan, waxa inagu waajib ah in aynu ka wada shaqayno nabadgelyada guud. Waxa aad xildhibaan ku tahay aniguna aan wasiir ku ahay waa sharciga; sidoo kale waxaannu nahay dad xeer ku nool, waana waajib in la ixtiraamo.
Fandhicilku ma xaaraan baa mise waa xalaal? Soo hadal-qaadkiisuba waa xaaraan. Marka hore, soo-bixitaankii la sameeyey ayuu xaaraan ahaa. Askariga gabadha dilay—ma hawlgal ayuu ku jiray mise si iskiis ah ayuu u falay? Annagoo dhammaanteen u damqanayna gabadhaas, haddana sharcigu waa ka weyn yahay qof walba; dadkeennuna marar badan ma kala gartaan qof hawlgal ku jira iyo qof kale.
Askarigu waa amar-qaate; amar ayuu sitaa wuuna fulinayaa—dable ha ahaado ama sarkaal ha ahaadee. Taasi waa in ay ina gashaa. Sidoo kale, 82-ka xildhibaanba waa in aynu ka shaqaynaa jiritaanka dalkeenna; kii qaldamana waa in aynu toosinaa.

**Su'aasha 2aad:** Dadka falalkaas sameeyey ma u aragtaan inay fal-danbiyeed galeen? Maxayse tahay tallaabada aad ka qaadaysaan? Dadka dacwoonaya sidee ayay u soo dacweynayaan?

**Jawaabta 2aad – Xeer-ilaaliyaha Ciidamada:** Dambigu laba qaybood ayuu u kala baxaa. Marka hore, waa in dhibane jiro—sida uu Wasiirkuba idiin sheegay. Qofku meel kasta ayuu ka dacwoon karaa, sida uu Dastuurku iyo xeerarkuba siinayaan. Qaybta kalena waa dambiyada Qaranka ka dhaca, kuwaas oo Xafiiska Xeer-ilaalintu iskiis u dhaqaajiyo.

**Su'aasha 3aad:** Dhaqaalaheenna aad buu u hooseeyaa; ku dhowaad 90% waxyaabaha la isticmaalo dalka dibaddiisa ayaynu ka soo dejinnaa. Ciidankuna waa "consumers"-ka ugu waaweyn ee la sahay-geeyo; muddo dheer ganacsato gaar ah ayaa u keenta raashinka, arrintaasna dhiig-bax ayay inoo tahay. Iyadoo aynu haysanno dhul ballaadhan oo wax laga soo saari karo, maxaa u diiday in wax-soo-saar la sameeyo—ciidanka ku filan isla markaana dadka wax u tara?

**Su'aasha 4aad:** Taliyuhu wuxuu ka hadlay xalinta arrimaha xuduudaha—taas oo aad iyo aad u qiimo badan. Haddana marar badan ayaa shaqaaqooyin soo noqnoqda ka dhacaan, mararka qaarkoodna madaxdu way isku khilaafaan xalinta. Ma jiraan ciidamo si gaar ah loogu tababaray xalinta khilaafaadkaas? Ma la siiyaa tababaro dadkaas si ay sharci ahaan ugu kala baxaan, halkii ay is dili lahaayeen?

**Jawaabta 4aad – Taliye Nuux:** Ciidanka Qaranka iyo Golaha labaduba way ogyihiin, dadkuna wuu ogyahay. Dadka ayaa qiimeeya ciidamada; gobollada barigana waxa la yidhaahdaa "ciidamadan iyo kuwii hore isku mid ma aha", waayo waxba ma dhacaan, waxna ma kufsadaan—shacabka ayaa ka markhaati ah. Joogitaankoodu wuxuu ku dhisan yahay xidhiidh ay dadka la leeyihiin. Tababar gaar ah oo arrintan uun ah ma jiro; waa nicmo Alle ina siiyey. Markii Golaha la furayay, 4,500 askari ayaa ka hawlgalay, arrintuna nabadgelyo ayay ku dhammaatay. Askarta mar walba waanu waaniyaa si ay shicibka ula yeeshaan xidhiidh wanaagsan.

**Su'aasha 5aad:** Sidee ayaad ula shaqaysaan Mudanayaasha laga soo doortay deegaannada ay shaqaaqadu ka dhacday? Haddii wada-shaqayn jirin, maxaad ula soo xidhiidhi weydeen?

**Su'aasha 6aad:** Waxaa jira dad badan oo ka cabanaya saraakiil gacan u qaaday. Markii aan saraakiishaas la xidhiidhnayna wada-shaqayn ma jirto. Dadkaas maxaad ku qancinaysaan iyadoo aan arrintooda si hufan wax looga qabanayn?

**Md. Jaamac Axmed Oogle:-** Anigu waxaan ahay qofkii ugu dambeeyay; su'aalo badan oo aan waydiin lahaa waa la waydiiyay. Kaliya dhawr su'aalood ayaan waydiinayaa, inkastoo qaar ka mid ah jawaabihii aad bixiseen aanay si waafi ah uga jawaabin, waxna iga dhimanyihiin.

**Su'aasha 1aad:** Sida aad sheegteen, ciidanka dhexdooda dilal ayaa ka dhaca; qisaasta qaar ka mid ah kiisaskana waa la dadajiyaa, qaarna sanado ayaa dib loo dhigaa. Qaar ka mid ah saraakiisha dhintay ehelkoodii waxay ku dul wareegayaan maxkamadaha, mana raalli aha xadhigga dheer; waxay doonayaan qisaas. Tusaale ahaan, Taliye Casayr oo dil wadareed lagu dilay gobolka Saaxil—kiiskiisu weli jeel buu yaallaa, halka kuwo dambe la fuliyey, iyo qaar dhawaan wax dilay oo hadda dil loo diyaarinayo. Haddaba maxaa keena in qaar dib loo dhigo qaarna si degdeg ah loo fuliyo, cadaaladna loo waayo?

**Jawaabta 1aad – Taliyaha Darajada 1aad ee Galbeedka:** Arrinta qisaasta oo aad mooddo inay soo noqnoqotay: fulinta dilalka, sida aad sheegtay, qaar waa la dib-dhigaa, qaarna waa la fuliyaa. Fulinta waxaa marka hore codsada ehelada marxuumka; marka kiisku maro jaranjarada ilaa Maxkamadda Sare, Madaxweynaha ayaa saxeexa. Haddii dhinaca dhibanaha aan laga helin wax heshiis ama tanaasul ah, khasab ayay noqotaa in fulintu dhacdo—goorta ay doontaba ha ahaatee. Degdegga waxaa keena codsiga iyo ku adkaysiga ehelada dhibanaha. Dadka qaar waxay dalbadaan fulin; marka ay bislaato waa la fuliyaa. Qaarna way heshiiyaan; qofku xabsi ayuu u sii xidhnaadaa ama qisaas ayaa la dalbaa oo la fuliyaa. Haddii ehelka dhibanuhu ku adkaysto qisaas, xeer iyo Madaxweyne midna ma hor istaagi karo.

Waxaa kale oo jirta in **raajintu mararka qaar daawo tahay**. Dacwadaha qaar marka la dedejiyo qoomamo ayaa ka dhasha; haddii aan dilka la dedejin, mararka qaarkood dadku

way soo debcaan, wayna heshiiyaan, taasina maslaxad ayay ku jirtaa. Qaar kalena maslaxaddu waxay ku jirtaa in la dedejiyo; qaddarkuna waa halkiis.

**Su'aasha 2aad:** Waxaa marar badan dhacda, marka laga yimaaddo shaqo qaran ee hadda darajo la siiyo, in ay jiraan dad si degdeg ah u dallaca, iyagoo saddex ama afar sano joogay, garbuhuna casaadaan, kii taliyaha u ahaa halkiisii ugu taga isaga oo xadhigle ama xiddigle ah, taasina ku noqoto niyad-jab. Haddii hadda la yidhaahdo waan tirinayaa, maxaa sabab u ah arrintaas, haddii aad leedihiin guddi arrimahaas ka fadhiya?

**Jawaabta 2aad – Taliye Nuux:** Xildhibaanku aad ayuu u mahadsan yahay. Sidaan horaba u sheegay, sharciga noo yaalla sida uu dhigayo ayaannu u dallacsiinnaa, darajooyinkana sidaas ayaannu u bixinnaa. Waxaa dhici karta mararka qaar in qof si toos ah loo soo dallacsiiyo, inkasta oo aanay waayadan dhicin. Hadda, ciidanka waddada aanu raacno waa tan; midna ma birimiyo, midna mid kale kama dhaafo. Hase yeeshee, waan jeclahay inaad ii timaaddo oo aad ii sheegto; anigoo wakhti ku siinaya ayaad iga dhaadhicin kartaa, haddii aanan garanayn.

**Md. Axmed-Yaasiin Maxamed Xasan:-** Waad mahadsan tahay Mudane Guddoomiye. Shir-guddoonka, Wasiirka, Taliyayaasha sharafta leh, Shaqaalaha iyo Saxaafadda—ASC. Hadalkaygu waa gaaban. Aad ayaan ugu faraxsanahay in Wasiirkii Gaashaandhigga iyo Taliyayaashii Qaranka, gaar ahaan Taliye Nuux Taani, ay halkan joogaan oo aan su'aalo weydiinayno; farxad gaar ah ayay noo tahay. Waanan u mahadnaqayaa samirka dheer iyo wakhtiga aad na siisay. Waxaan doonayaa inaan su'aal weydiiyo, soo-jeedin sameeyo, codsina raaciyo.

**Su'aasha 1aad:** Miisaaniyaddii aan sannadkan ansixinnay, madax-xisaabeedka **Magta**, waxa ciidanka ugu jira nus-milyan Somaliland shilin (500,000 SLSh), oo u dhiganta ku dhowaad 60,000 dollar. Iyadoo hawlgallada ciidamadu badan yihiin magtuna idinku badan tahay, ma heshaan caawimo intaas ka badan?

**Jawaabta 1aad – Taliye Nuux:** Lacagta magta wax baa naga soo gaadha; wax kale oo dusha laga bixiyaana way jiraan.

**Su'aasha 2aad:** Laga soo bilaabo Lawyo-Caddo, Saylac, Baki ilaa Boorama, waxaa la ogyahay in saldhigga Boorama u yahay xafiis Taliyaha Qaybta, Taliyaha, Birmadka, Ka-Xuuraanka, Ka-Dab-damiska, Ka-Taraafikada iyo dhammaan ciidamada kale. Xafiiskaasi waa mid kooban, taliyayaashuna mararka qaar way wada galaan, qaarna hoos geedaha ayay fadhiyaan. Maxaa xafiisyo loogu samayn waayey? Sidoo kale, **Xerada Goroyo-Cawl** waa xeradii ugu horraysay, hooyadii Somaliland; maanta xuduuddeheedii magaalada ayaa gaadhay. Waxaan jeclaan lahaa in aad ka hawlgashaan, maadaama ay tahay xeradii tababarka ugu horraysay, in talis laga dhiso ayaan soo-jeedinayaa. Sidoo kale, taliyayaashaas is-dul-saarran waxaan soo-jeedinayaa in xafiisyo loo sameeyo.

Arrinta codsiga ah, su'aalaha kuma badinayo Taliye—waayo Abti ayaan kuu ahay—wixii kalena xafiiska ayaan kuugu iman doonaa, insha Allaah. Aad ayaad u mahadsan tihiin.

**Jawaabta 2aad – Taliye Nuux:** Xafiisyada Goroyo-Cawl iyo Sheekh labaduba waa laba dugsi oo taariikh leh. Markii Ingiriisku samaynayay, study ayuu ku sameeyay, si iska ahna uma samayn. In xerooyinkaas la dhiso rajo weyn baanu ka qabnaa, marba inta uu dhaqaalaheennu noo saamaxo. Waa taariikh, meelaha ay ku yaallaanna si gaar ah ayaa loo doortay.
Arrinta aad tidhi ee is-dul-fadhiya: ciidan ahaan taliskayagu waa Goroyo-Cawl, aagga galbeedna Geerisa ayuu ku yaallaa. Keliya xafiiska magaalada ee noogu dhow waa kan hub-ka-dhigista laga sameeyo; talis joogto ah magaalada kuma lihin. Hase yeeshee, way fiicnaan lahayd in taliyuhu xafiis ku yeesho magaalada si uu dadka ula kulmo; taasna, insha Allaah, maskaxda waanu ku haynaa.

**Guddoomiye Giire:** Aad ayaan ugu mahadnaqayaa Taliyaha. Waxaan ka cudur-daarranayaa xildhibaanno qornaa oo aanan siin fursad—kuwaas oo ay ka mid yihiin Md. Abuubakar, Xildhibaan Guuleed, Xildhibaan Casoowe iyo Xildhibaan Fu'aad—maadaama marti inoo timid ay ahayd. Sidoo kale, aad iyo aad ayaan ugu mahadnaqayaa Wasiirka, Taliyaha Ciidanka Qaranka iyo saraakiisha la socota, yeedhmadii dastuuri ahayd ee Golaha Wakiilladu u yeedhay ay ka soo jawaabeen. Halkan waxaan fariin uga dirayaa wasaaradaha kale ee ka meeraysanaya inay Golaha yimaadaan, in ay gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah. Mar labaad iyo mar saddexaadba aad ayaan ugu mahadcelinayaa Wasiirka, Taliyaha iyo Mudanayaasha. Salaaddii waa la tukaday, shirkiina wuu xidhmay. Khayr ayaan idiin rajaynayaa.

| | |
| --- | --- |
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------ | -------------------------------------- |